



Gaadhi ku Kaxaynta Xaaladaha Adag

- Hayso Agabka Gaadhiga ee Xaaladaha Degdegga ah Wakhtiga Qaboobaha oo dhammaystiran (hoos ku xusan).
- Shidaalka gaadhigu hakuu buuxsanaado ugu yaraan illaa kala badh.
- Ku xidh gaadhiga taayirada xiliga qaboobaha oo fiican oo si wacan u banjarsan cusubna.
- Hayso walaxda lagaga xoqo barafka muraayada hore iyo iskoobe yar si aad barafka ugaga qaado. Ka nadiifi daaqadaha, laydhadhka dambe, iyo laydhadhka horeba barafka.
- Iska eeg kan ka hortaga inuu gaadhigu qaboobo (antifreeze), baytaryada, iyo nadiifiyayaasha muraayada hore, biyaha muraayadda hore lagu nadiifiyo.
- U qorshee safarada si taxaddar leh, eeg saadaalinaha cimileed si aad u hesho xogtii ugu dambaysay dhagaysona raadiyaha si aad u ogaato wixii cusub marka aad safarka ku gudo jirto.
- La socodsii dadyawga kale jadwalka wakhtiyeedka aad dajisatay iyo waddooyinka kale ee aad mari karto. Sii wakhti dheeri ah si aad ugaadho barta aad usocoto.
- Aayar soco, khattaraha sida barafka qarsoon (black ice) lama arko illaa iyo marka aad dhexgasho uun. Ogsoonow in buundooyinka iyo waddooyinka sare ay ka hor qaboobaan waddooyinka.
- Taxaddar dheeri ah muuji. Barafka tuurma iyo barafka qararka waddooyinka waxay kuu qararin karaan caruurta ama gawaadhi kale.
- Sii baraf gurayaasha masaaxad ku filan si ay qaab ammaan ah ugu qabtaan shaqadooda. Dulqaad yeelo dabagalna adigoo masaafu fiican ujirsanaya.
- Haddii aad ka baxdo wadada marka barafku da'ayo
 - Ku jir gaadhigaaga halkaasoo dadka wax badbaadinaya ay ka fududaan karto inay kaa helaan. Bakhtii gaadhiga kana nadiifi barafka ama waxa kale ee aawdaya tuubada qiiqa haddii aad taasi usamayn karto qaab ammaan ah.
 - Shid matoorka iyo kulayliyaha gaariga ku dhawaad 10 daqiiqo saacadiiba si aad isu kulayliso. Marka gaadhigu shidan yahay, inyar fur daaqada si ay hawo kuugu soo gasho. Marka aad muddo joogtaba ka nadiifi barafka tuubada qiiqa.

- Cab biyo si aanad ufuuq bixin.
- Ka taxaddar inaad baytariga dabkiisa dhammayso. Isu miisaan baahiyaha tamarka korontada: isticmaalka laydhadhka, kulka, iyo raadiyaha.
- Ka dib marka barafka da'ayaa joogsado, kor uqaad dhash kawarka gaadhiga si aad umuujiso inaad caawimo ubaahan tahay.

Agabka Xaaladaha Degdegga ah ee Gaadhiga:

- Toosh ay kuula socdaan baytaryo dheeri ah
- Taleefan dabaysan/dabeeyaha gaadhiga
- Agabka gargaarka degdegga
- Middida jeebka
- Bustayaal ama shandadadaha lagu seexdo (sleeping bags)
- Maryo dheeri ah (oo ay ka mid yihiin agabka roobka, buudhka, galoofyada facanta, sharabaadada)
- Cunno aan hore uxumaanayn oo kaalorigeedu sarreeyo (khudaarta la qallajiyaya, midhaha, cunnada qassaacadaysan)
- Burushka iyo xoqaha muraayada hore
- Dab damiyaha
- majarafad(badeel)
- Agabka wax lagu furfuro ee aasaasiga ah (kalbad, kiyaawo, kaashawiito)
- Xadhiga gaadhiga lagu jiido
- Waayirada gaadhiga dabka loogu qabto
- Samaan fareyaasha/calaamadaha waddada
- Maro midaba ifaya leh si aad calan ahaan ugu isticmaasho
- Khariiradaha waddooyinka